



Cabot's core values are:  
**Partnership Inclusion Excellence**

**Cabot Primary School**

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.bristol.sch.uk

Talaada 13<sup>da</sup> Juun 2023

Gacaliyayaal Qoysas,

Aad ayey u wanaagsan tahay inaan idiin arko dhammaantiin oo dib ugu soo noqday, diyaarna u ah waxbarashada fasaxii nus-xilliga ka gadaal.

Xilligaan mar walba waa mashquul maadaama uu sannad-dugsiyaydeedka dhammaanaayo loona diyaar garoobaayo midka soo socda. Fadlan ka fiiri taariikhaha hoose dhacdooyinka soo socda. Sidoo kale, fadlan fiiri dhambaalka taleefanka maadaama aan badanaa ku soo dirno xasuusinta.

Maadaama hawada ay kuleyl ahaaneyso, fadlan xaqiiji inaad carruurtaada ay dugsiga u soo qaataan koofiyado iyo dhalooyinka biyaha iyo in ay soo marsadaan burcadka-qorraxda inta ay dugsiga imaadin.

Waxaa kaloo aan dooneynaa inaan ku xasuusinno iyadoo qeyb ka ah dadaalkeenna in ay carruurta nabad-qabaan, inaan idiinka fileyno in carruurta uu dugsiga keeno kana kaxeeyo qof qoyska ah ama qaraabo ah ama saaxiib ah oo da'diisu tahay 16 ama ka weyn. Aad ayaad ugu mahadsan tahay caawinaaddaada arrintaan ku saabsan.

Ugu dambeyn, waxaan dooneynaa inaan u tahniyadeyno Mrs Carter iyo Miss Thompson, kuwaasoo ka tegaaya Cabot maadaama ay shaqo cusub ka heleen dugsiiyo u dhaw halka ay deggen yihiin.

Mahadsanidiin,  
 Mrs L-H

**Imaanshaha**

Aad ayaad ugu mahadsan tihiin dhammaantiin shaqada adag ee ah inaad xaqiijisaan in canug walba uu dugsiga yimaado sida ugu badan ee macquulka ah kuna yimaado waqtigii la rabay.

Usbuucii hore, imaanshaha guud ee dugsiga wuxuu ahaa 95%. Aan isku dayno in usbuucaan aan halkaas dhaafno. Hambalyo Fasalka 2 oo gaaray 97% imaanshaha usbuucii hore, Fasalka 5 oo gaaray 98% imaanshaha iyo Fasalka 4 oo gaaray 100%. Cilmi-baarista waxay tibaaxeysaa seegitaanka 1-2 maalmood bishii, in ay dhalin karto in carruurta dib-u-dhac ku yimaado.



**Taariikhaha Xusuus-Qorka**

- 16<sup>da</sup> Juun karnafaalka Fasalk 6 – Qoysaska fasalka 6 waa ka soo qeyb geli karaan
- 26<sup>ka</sup>/27<sup>da</sup> Juun Maalinta Xayawaanka
- 27<sup>da</sup> Juun – Guddiga Akadeemiyada ayaa u qabanaaya subaxa qaxwaha waalidiinta
- 1<sup>da</sup> Juulaay – Karnafaalka St Paul
- 3<sup>da</sup> Juulaay – Usbuuca Guriga
- 7<sup>da</sup> Juulaay – La-wadaagid Warbixinta
- 20<sup>ka</sup> Juulaay – Maalinta ugu dambaysa xilliga (Maalin INSET 21.07.21)

**Dib-u-soo-warbixin**



Waa mahadsan yahay qof walba kaasoo waqti ku bixiyey isticmaalka sanduuqa codka qoyska ee xafiiska kuna qoray faallo. Aad ayey u wanaagsan tahay in la arko faallooyin wanaagsan iyo sidoo kale meelo ay kula tahay inaan dugsiga ka hagaajinno. Waxaa fiirin doonnaa faallooyinkaas marka aan u diyaar-garoobeyno sannadka soo socda si aan horumar u gaarno.

Waxaan dhab ahaan u qiimeynaa xiriirka annaga iyo idinka naga dhaxeeya, waxaanna rajeyneynaa inaad og tahay in aan mar walba aan ku dhageysanno haddii aad qabto walaac maadaama aan rano in carruurta ay helaan waxbarashada ugu wanaagsan ee macquulka ah.

**Badbaadada Internetka**

Badbaadada internetka waa qeyb muhiim ah ee dunida aan ku nool nahay.

Waxaan mar walba carruurta xasuusinnaa muhiimadda in aan internetka lagu wadaagin macluumaadka shaqsiga ee ay la wadaagaan oo keli ah dadka ay dhab ahaan u yaqaanaan. Fadlan arrintaan naga caawin xasuusina marka ay guriga joogaan oo ay qalabka isticmaalaayaan. Waad ku mahadsan tahay taageeradaada.



Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumto warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii Mudane Rea ee xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630